

Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah Waaxda Tirokoobka Puntland



TUSAHA SICIRKA ADEEGGA DAMBIISHA

OKTOOBAR 2021

Warbixinta Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha ee Bisha Oktoobar, 2021

Muunadda dambiisha adeegga qoysaska Puntland waxay ka koobantahay 387 shey oo isugujira 12-ka qeybood ee hanaanka caalamiga ah ee kalasocidda adeegyada iyo badeecadaha iyadoo loo-eegayo isticmaalka badeecad walba. Dambiishaan ayaa loo isticmaalaa lasocoshada iyo xisaabinta isbeddelka qiimaha maciishada.

Shaqaalaha Waaxda Istaatistikada Dawladda Puntland ayaa xogta sicirka mid kasta oo kamid ah 387-daan shey ka soo urruriyaan suuqyada dhammaan magaaloooyinka waaweyn ee Puntland si asbuucle ah.


Dhaqdhaqaaqa Billaha ee Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha

Tusaha Guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha Suuqyada Puntland (TSD) ayaa intii lagu gudajiray bishii Oktoobar 2021 kor uga sookacay 91.58, gaarayna 91.71. Isbedelka billaha ah ayaa bishan Oktoobar kordhay 0.15 boqolkiiba, halka bishii ka horaysay ee Sabteembar 2021, uu jiray korar dhan 0.77 boqolkiiba.

Qeybaha badeecadaha ee sicirkoodu bishii Oktoobar sida xoogan ukacay marka loo eego qeybaha kale ayaa kala ah: Isgaarsiinta (1.65%), Tubaakada and Jaadka (1.11%), Cuntada iyo cabitaanada (1.08%), Adeegga Makhaayadaha iyo Huteelada (0.67%).

Dhaqdhaqaaqyadan togan ee kore waxaa qayb ahaan hoos u dhigay qiima dhaca ku yimid qeybaha Dharka iyo Kabaha (-2.84 %), Badeecadaha isku-dhafka ah (-1.12%), Caafimaadka (-1.03), iyo Agabka Qurxinta, qalabeynta iyo dayactirka Aqallada (-0.72%). Sida hoos ka muuqata, hoos u dhaca taban ee qeybahani isbedel xogleh kuma keenin Jiitimaad ku sugnaanshaha Jaantuska dhaq-dhaqaaqa tusaha guud ee sicirka adeegga dambiisha.


Jaantuuska laad: Jaantuusyada Heerka Sicir Bararka Iyo Dhaqdhaqaaqa Tusaha Guud Ee Sicirka Dambiisha Bisha Oktoobar, 2021.



Jadwalka 1aad: Heerka Sicirbararka billaha ah ee Oktoobar 2021 (2015=100)

Tusaha Sicirka Dambiisha, Oktoobar 2021	
Tusaha (bishaan) =Oktoobar 2021	91.71
Tusaha (bishiihore) =Sabteembar 2021	91.58
Tusaha (Sabteembar, Sanadkiihore) = Oktoobar 2020	89.20
Isbedelka % billaha ah = Sabteembar 2021/Oktoobar 2021	0.15
Isbedelka % sanadlaha ah (heerkasicirbararka) =Oktoobar 2020/ Oktoobar 2021	2.82

Jaantuuska 2aad: TD, Isbedelka Billaha Ah ee Qeybaha Dambiisha



Qaybaha isbedelka ugu badan ee dhanka Togan Ku Yimid Bisha Oktoobar 2021

- **Isgaarsiinta:** ayaa waxaa ku yimid kor u kac dhan (1.65%) intii lagu gudajiray bishii dhammatay ee Oktoobar 2021, halka bishii ka horeysay ee Sabteembar aan la diiwangalin wax isbeddel ah (0.00%). Isbedelka bisha Sabteembar waxaa keenay qiima korar ku yimid adeegga talefannada oo kacay (1.75%).
- **Tubaakada iyo Qaadka:** sicirkooda ayaa waxaa ku yimid kor u kac dhan (1.11%) intii lagu gudajiray bishii dhammatay ee Oktoobar 2021, halka bishii ka horeysay ee Sabteembar ladiiwangaliyey (2.87%). Isbeddelka bisha Oktoobar waxaa keenay qiima korar ku yimid Qaadka (1.21%).
- **Cuntada Iyo Cabitaanadda:** ayaa waxaa ku yimid kor ukac dhan (1.08%) intii lagu gudajiray bishii tagtay ee Oktoobar 2021, halka bishii ka horeysay ee Sabteembar 2021 la diiwaangaliyey qiima korar dhan (2.07%). Sicir kororka qeybtaan ee bishii Oktoobar ayaa waxaa sababay qiimaha Cabitaannada oo kacay (1.66%) iyo Cuntada oo iyana kacday (1.05%).
- **Makhaayadaha iyo Huteelada:** sicirkooda ayaa intii lagu gudajiray bishii dhammaatay ee Oktoobar 2021 iyana waxaa kuyimid kor ukac dhan (0.67%) halka bishii ka horayasay ee Sabteembar la dawiingaliyay qiimo dhac dhan (0.54%) sare ukaca ku dhacay qeybtaan ee bishii Oktoobar intiisa ugu badan waxaa sababay kor ukac ku yimid adeegga cuntada (0.74%).

Qaybaha is-bedelka ugu badan ee dhanka Taban Ku Yimid Bisha Oktoobar 2021

- **Dharka iyo kabaha:** ayaa intii lagu gudajiray bishii Oktoobar 2021 waxaa sicirkooda ku yimid hoos u dhac gaaraya (-2.84%), marka loo eego bishii ka horeysey ee Sabteembar 2021 oo la diiwaangaliyay hoos dhac dhan (-2.10%), waaxaana u sabab ahaa hoos udhac ku yimid sicirka Dharka (-3.46%).
- **Badecadaha isku-dhafka ah:** sicirkooda ayaa itii lagu gudajiray bishii dhammaatay ee Oktoobar 2021 iyana waxaa ku yimid qiimo jab gaaraya (-1.12%), halka bishii ka horaysay ee Sabteembar la diiwaangaliyay qiimo korar dhan (0.83%), Sicir-jabka qeybtaan waxaa sababay agabka xaragadah oo hoos u dhacay (2.42%).
- **Caafimadka:** ayaa intii lagu gudajiray bishii Oktoobar 2021 waxaa sicirkooda ku yimid hoos dhac dhan (-1.03%), marka loo eego bishii ka horeysey ee Sabteembar 2021 oo la diiwaangaliyay hoos dhac gaaraya (0.31%), waaxaana u sabab ahaa sicirka qalabka caafimaadka oo jabay (-2.39%).
- **Agabka Qurxinta, qalabeynta iyo dayactirka Aqallada:** ayaa waxaa ku yimid hoos u dhac dhan (-0.72%) intii lagugudajiray bishii Oktoobar 2021, halka bishii ka horaysay ee Sabteembar 2021 uu jiray sicir barar dhan (0.41%). Isbedalka qeybtaan ee bishii Oktoobar waxaa keenay hoos udhac ku yimid allaabada guriyaha (-1.61%), iyo Maacuunta guryaha (-1.11%).

Tusaha Sicirka Dambiisha: Qaybo Si Gaar Ah Loo Eegay, Oktoobar 2021

Cuntada Iyo Cabitaanada, Kirada Guryaha, Adeegyada, Biyaha, Korontada, iyo Gaaska: ayaa celcelisahaan hadda ah qaybaha ugumuhiimsan dambiisha Addega, maadama ay saamiga ugu badan ka yihiin kharashaadka qoysaska, tan ayaa ka dhigaysa qeybahaan inaysameynta ugu badan ku yeeshaan isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha Sida aynu kor kuso sheegnay.

Cuntada Iyo Cabitaanadda: sicirkooda ayaa kor u kacay (1.08 %) bishii dhammaatay ee Oktoobar 2021 halka bishii ka horeysay ee Sabteembar ladiiwangaliyey sicir barar dhan (2.07%). Qaybta cuntada iyo cabitaanada ayaa 12kii billood ee ku dhamaanayey Sabteembar 2021 waxaa ku yimid kor ukac sanadle ah oo u dhigma (4.69%), marka loo eego sicir bararka sanad dhammaadkii ama 12kii billood ee ku idlaanayey Sabteembar 2021 kaasoo ahaa kor u kac dhan (3.59 %).


Jadwalka 2aad: Isbedelka Billaha ah ee qeybaha ugu muhiimsan Cuntada (Agoosto 2021 ilaa Oktoobar 2021)

	Agoosto	Sabteembar	Oktoobar
CuntadaiyoCabitaanada	1.07	2.07	1.08
Cuntada	1.11	2.28	1.05
Rootiga, Bariisaka, Burka iyobadarka	0.49	4.19	0.11
Sonkorta	0.70	0.61	1.53
Hilibkanoocyadaxoolaha	0.87	3.70	9.88
Kalluunka	10.06	0.01	-6.95
Caanahaliiska ah iyokalluunka	0.26	2.19	0.66
Saliidaiyoashyaadadufankaleh	3.56	1.90	1.13

Miro Beeraadkasida Cambaha & Muuska	-1.28	-0.78	1.86
Khudaarta Cagaaran	0.17	2.21	2.10

Dhankakale, **Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada iyo Gaaska** ayaa sicirkoodu hoos u dhacay (0.26%) bishii dhammaatay ee Oktoobar 2021, marka loo-barbar dhigo bishii Sabteembar oo la diiwaan-galiyey qiimo koror dhan (0.10%). 12kii billood ee ku dhamaanayey Oktoobar 2021, waxaa **Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada iyo Gaaska** ku yimid hoos u dhac sanadle ah oo u dhigma (1.01%) marka loo eego sicir jabkii sanaddhammaadkii ama 12kii billood ee ku idlaanayey Sabteembar 2021 oo gaarayey hoos u dhac dhan (0.62%).

Jaantuuska 3aad: TSD Guud Iyo Qeybo Si Gaar Ah Loo Egay



Source: Puntland Statistics Department


Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ee Tusaha Sicirka Dambiisha ee Sanad Dhamaadka Oktoobar 2021

Isbedelka sanadlaha ah ee heerka sicirbararka 12kii billood ee u dhexeeyey billihii Oktoobar 2020 ilaa Oktoobar 2021 ayaa ahaa koror dhan 2.82 boqolkiiba, halka sanad dhammaadkii kuxirmayey Sabteembar 2021 la diiwaangaliyay sicir koror dhan 2.87 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu sida xoogan u siyaaday 12-kii billood ee u dhexeeyay Sabteembar 2020 ilaa Sabteembar 2021 ayaa kala ahaa: Maqakhaayadaha iyo huteelada (11.65%), Agabka qurxinta iyo qalabeynta Aqallada (7.02%), Waxbarashada (6.25%), Qaadka iyo Tubaakada (5.21%), Cuntada iyo Cabitaannada (4.69%), iyo Adeegga Safarka (4.11%).

Dhanka kale, waxaa hoos u dhac kuyimid: Dhaqanka iyo madadaalada (-4.33%). Guud ahaan sicirkoror ayaa ku dhacay Tusaha Adeega Sicirka Dambiisha.

TSD: Jaantuuska 4aad; Sicir-bararka sanadlaha ah ee qeybaha badeecadaha iyadoo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala soocidda badeecadaha; Oktoobar 2021.



Qeybaha Isbeddelka Togan kudhacay Sanadkii ay u dambaysay bisha Oktoobar 2021

- Makhaayadaha iyo Huteelada:** ayaa sicirkodu intii lagu gudajiray sanadkii ku dhammaaday bishii Oktoobar 2021 kor u kacay (11.65%), marka loo eego sanadkii ku xirmayey bishii ka horaysay ee Sabteembar 2021 oo la diiwaangaliyay qiimo korar dhan (9.85%). Sicir bararka sanadkii ku idlaanayey Oktoobar ayaa waaxaa u sababa ahaa sare ukac ku yimid adeegga Cuntada oo gaarayey (13.01%).
- Agabka Qurxinta, qalabeynta iyo dayactirka Aqallada** ayaa intii lagu gudajiray sanadkii ku xirmayey Oktoobar 2021 waxaa ku yimid qiimo korar gaaraya (7.02%), halka sanadkii ku dhammaaday Sabteembar 2021 la diiwaangaliyay sicirbarar u dhigma (7.19%), Sicir bararka qeybtaan ee Oktoobar waxaa loo tirin qalabeynta iyo dayactirka aqallada oo kacay (16.50%).
- Waxbarashada:** ayaa intii u dhaxeysay Oktoobar 2020 ilaa Oktoobar 2021 waxaa ku yimid kor u kac sanadle ah oo gaaraya (6.25%), marka la barbar dhigo sanadkii ku idlaanayey Sabteembar oo uu jiray isbeddel dhan (6.19%). Sicir-bararka sanadlaha ah Oktoobar waxaa sababay sicirka qiimaha Dugsiga sare oo kacay (10.06%).
- Qaadka iyo Tubaakada:** ayaa intii lagu gudajiray sanadkii ku xirmayey bishii Oktoobar 2021 waxaa ku yimid qiimo korar gaaraya (5.21%), halka sanadkii ku dhamaaday bishii kasi horaysay ee Sabteembar 2021 la diiwaangaliyay sicir barar u dhigma (2.56%) waxaa sababay Tubaakada oo kacay (7.51%).
- Cuntada iyo cabitaannada:** ayaa intii u dhaxeysay Oktoobar 2020 ilaa Oktoobar 2021 waxaa ku yimid kor u kac sanadle ah oo dhan (4.69%), halka sanadkii ka horey ee ku dhamaanayey bishii Sabteembar 2021, la diiwaangaliyey sicir-barar sanadle ah oo gaarayey (3.59%). Sicir-bararka sanadlaha ah ee Oktoobar waxaa

sababay sicirka qiimaha cuntada oo kordhay (4.88%).

- **Adeegga Safarka:** Sicirka Adeegga safarka ayaa intii u dhaxeysay Oktoobar 2020 ilaa Oktoobar 2021 waxaa ku yimid kor u kac sanadle ah oo dhan (4.11%), halka sanadkii ka horeyey ee ku dhamaanayey bishii Sabteembar 2021 la diiwaangaliyey sicir-barar sanadle ah oo gaarayey (5.39%). Sicir-bararka sanadlaha ah ee Oktoobar waxaa sababay sicirka qiimaha adeegga safarka qofka oo kordhay (25.70%).

Qeybaha Isbeddelka Taban ku dhacay Sanadkii ay u dambaysay bisha Oktoobar 2021


- **Badeecadaha Dhaqanka iyo madadaalada:** sicirkooda ayaa hoos u dhacay (-4.33%) intii lagu gudajiray sanadkii ku xirmayey bishii Oktoobar 2021, halka sanadkii ku dhamaanayey bishii ka horeysay ee Sabteembar la diiwaangaliyey qiimo dhac dhan (-4.47%). Sicir jabka badeecadaha dhaqanka iyo madadaalada ku yimid intii lagu gudajiray sanadkii ku xirmayey bishii Oktoobar waxaa keenay sicirka adeegga dhaqanka iyo madadaalada hoos u dhacay (-12.62%).

Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha: Sookoobidda dhaq-dhaqaaqa iyo Dhibco kubiirinta Miisaanka Dambiisha

Jadwalka3: Tirooyinka gumuhiimsandhaq-dhaqaaqyada Juun 2021 (Index = 100 at 2015)

COICOP Classification Group	Oct-20 Index	Sep-21 Index	Oct-21 Index	Sep-21 to Oct-21 (monthly) % change	Oct-20 to Oct-21 (annual) % change
TSD ee dhaman qaybaha badeecadaha	89.20	91.58	91.71	0.15	2.82
Cuntada iyo Cabitaanada	86.27	89.36	90.32	1.08	4.69
Tubaakada iyo Jaadka	98.26	102.24	103.38	1.11	5.21
Dharka iyo Kabaha	92.08	96.05	93.32	-2.84	1.35
Kirada guryaha, Biyaha, korontada, Gaaska iyo Shadaalda kale	87.42	86.76	86.53	-0.26	-1.01
Agabka guryaha iyo Dacdirka	87.62	94.45	93.77	-0.72	7.02
Caafimaadka	96.33	96.26	95.26	-1.03	-1.10
Gaadiidka	99.53	103.40	103.62	0.21	4.11
Isgaarsiinta	87.49	87.76	89.21	1.65	1.96
Dhaqanka iyo Madadaalada	105.89	101.48	101.30	-0.18	-4.33
Waxbarashada	90.61	96.22	96.27	0.05	6.25
Maqaaxiyaha iyo Huteelada	86.79	96.26	96.90	0.67	11.65
Badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah	126.01	129.92	128.47	-1.12	1.96

Jaantuuska 5aad: Sida qaybaha Dambiishu ay Dhibcaha ugu biiriyaan Tusaha Guud iyadaoo la eegayo miisaanka Qeyb waliba leedahay



Source: Puntland Statistics Department

FG: Saameyntay qayb kasta oo kamid ah qeybaha uu ka koobanyahay hanaanka kala soocida badeecadaha ay ku yeelanayso isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha waxay kuxirantahay hadba saamiculeyska ay qeybwalba ka tahay culeys dhismeedka Guud.